JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |

# XEERKA LIISAMADA GANACSIGA SOMALILAND
# XEER LR.98/2021

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2022*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-704/072021** **Taar: 28/07/2021**

# Wareegto Madaxweyne

## Dhaqan-galka Xeerka Liisamada Ganacsiga

**Markaan Arkay:** **Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;**

**Markaan Arkay:** **Qodobbada 11aad, 75aad, 76aad, 77aad iyo 113aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;**

**Markaan Arkay:** **Go'aanka Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland, Go'aan Lr. GW/KF-45/891/2021 ee ku taariikheysan 10/07/2021, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Liisamada Ganacsiga, Xeer Lr.98/2021;**

**Waxaan soo-saaray;**

**Dhaqan-galka Xeerka Liisamada Ganacsiga Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr.98/2021.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND President

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Liisamada Ganacsiga Somaliland Xeer Lr. 98/2021**

## GOLAHA WAKIILADDU

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka **11aad, 12aad, 75aad, 76aad iyo 77aad ee** Dastuurka Qaranka JSL. |
| Markuu Arkay: | Muhiimada ay leedahay in la helo xeer si sharciga waafaqsan u kala xadeeya Ganacsiyada kala duwan ee dalka ka jira iyo heerarka kala duwan ee liisamada ganacsigu kala leeyihiin, isla markaana la hirgaliyo hab-raac iyo kala-xadayn ganacsi oo la raaco. |
| Markuu Aqoonsaday: | Baahida loo qabo xeer suura galiya mabaadiida Dastuurku u jideeyay xaqiijinta xuquuqda cadaalad qaybsiga bulshada ee dhinacyada adeegyada iyo fursadaha dhaqaalaha, si loo dhiirigeliyo isla markaana loo soo jiito maalgashiga loona fududeeyo adeegyada ay u baahan yihiin shirkadaha. |
| Markuu Arkay: | Soo jeedinta Xukuumada ee Qabyo-qoraalka Xeerka Liisamada Ganacsiga oo ay Golaha Wakiilada u soo gudbisay |

**Markuu Arkay:** Go'aanka Ansixinta Xeerka Liisamada Ganacsiga Somaliland **Xeer Lr. 98/2021** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **03/04/2021** kalfadhigii **45aad** fadhigiisi **15aad.**

**Markuu Arkay:** In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ayna ku sameyn kuna ansixiyeen shan iyo afartan **(45)** cod Xeerka Liisamada Ganacsiga Somaliland **Xeer Lr. 98/2021** kuna taariikhaysnaa **28/06/2021.**

# Wuxuu

Cod aqlabiyad ah oo laba iyo sodon **(32 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Liisamada Ganacsiga Somaliland Xeer Lr. 98/2021.**

**ALLAA MAHAD LEH**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

Baashe Maxamed Faarax
GuddoomiyahaeeGolahaWakiilada JSL.

## Jamhuuriyada Somaliland
## GOLAHA WAKIILLADU

**Markuu Arkay:** Qodobka $11^{aad}$, $12^{aad}$, $75^{aad}$, $76^{aad}$ iyo $77^{aad}$ ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu Arkay:** Muhiimada ay leedahay in la helo xeer si sharciga waafaqsan u kala xadeeya Ganacsiyada kala duwan ee dalka ka jira iyo heerarka kala duwan ee liisamada ganacsigu kala leeyihiin, isla markaana la hirgaliyo hab-raac iyo kala-xadayn ganacsi oo la raaco.

**Markuu Aqoonsaday:** Baahida loo qabo xeer suura galiya mabaadiida Dastuurku u jideeyay xaqiijinta xuquuqda cadaalad qaybsiga bulshada ee dhinacyada adeegyada iyo fursadaha dhaqaalaha, si loo dhiirigeliyo isla markaana loo soo jiito maalgashiga loona fududeeyo adeegyada ay u baahan yihiin shirkadaha.

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Xukuumada ee Qabyo-qoraalka Xeerka Liisamada Ganacsiga oo ay Golaha Wakiilada u soo gudbisay

## Waxaa uu ansixiyay

## Xeerka Liisamada Ganacsiga Somaliland
## Xeer Lr. 98/2021

## QAYBTA 1AAD

## QODOBO GUUD

### Qodobka 1aad

### Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa **Xeerka Liisamada Ganacsiga Somaliland, Xeer Lr. 98/2021**

### Qodobka 2aad

### Erey Bixin

Haddii aan si ka duwan loogu qeexin faqrad, qodob ama cutub ka mid ah xeerkan ama aan si kale nuxurka tuduca ay ku jiraan u tilmaamin, ereyada iyo weedhahan soo socda waxa loo macnaynayaa sidan:

1) **"Xeerka"** waxa loola jeedaa Xeerka Liisamada Gananacsiga Somaliland;
2) **"Ganacsade"** waxa loola jeedaa cid kasta oo ku leh meherad ganacsi keli ahaan, shuraako ahaan, iskaashato ahaan, ama shirkad ahaan oo macaash doon ah kana shaqaysta iibinta badeecad ama adeeg ka mid ah hawlaha shaqo ee ku tilmaaman Xeerkan iyo Xeerka Ganacsiga Guud;
3) **"Hawl/shaqo ganacsi"** waxa loola jeedaa ka ganacsiga meherad, warshad waxsoosaar, adeeg bixin, badeecad ama maalgalin ganacsi I.W.M;
4) "**Adeeg**" waxa loola jeeda xeerkan gudihiisa nooc kasta oo ganacsi adeeg-bixin ah oo looga dan leeyahay in lagu kasbado dakhli aan ahayn mushahar;
5) **"Wakiil ganacsade** (commercial agent)" waxa loola jeeda shaqsi ama shirkad loo wakiishay inuu u metalo ganacsade mulkiile ah ama shirkad ugana wakiil noqdo meel gaara ama dalka oo dhan ama qayb ka mida awoodihiisa fulinta hawlo ganacsi iyo/ama gelidda heshiisyada khuseeya ganacsiga loo wakiishay;
6) **"Shirkad"** waxa loola jeedaa shirkad lagu aasaasey ama loo diiwaan-galiyay si waafaqsan Xeerka Shirkadaha Somaliland ee Xeer Lr. 80/2018;
7) **"Shuraako** (partnership)**"** waxa loola jeeda ganacsi ay ku bahoobeen laba ganacsade ama in ka badan loona aasaasey si waafaqsan Xeerka Ganacsiga Guud ee Somaliland;
8) **"Ganacsi hal-mulkiile ah** (Sole properitorship)" waxa loola jeedaa ganacsi uu leeyahay hal qof oo dabiici ah (natural person) isla markaana aan ahayn shirkad shakhsiyad jiritaan qaanuuni ah leh;
9) **"Mihnad Cayiman"** waxa loola jeedaa xirfadlayda sida bahda caafimaadka, dawo-yaqaanka (pharmacists); dhakhaatiirta, xirfad yaqaanada muraayadaha indhaha, lataliyeyaasha ganacsiga iyo dhaqaalaha; garyaqaanada, hantidhawrada, xisaabiyeyaasha iyo qof kasta oo kale oo ku shaqaysta xirfad aan sharciyaysnayn qofna loo ogoleyn in uu ku shaqaysto ilaa uu ruqsad ka haysto hay'ad awood u leh mooyee;
10) **"Ruqsad"** waxa loola jeedaa warqad ogolaansho hawl-qabad oo ay bixisay hay'ad ama wasaarad awood u lehi si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee ay khusayso iyadoo loo siiyay si uu u dalbado liisanka ganacsi ee khuseeya shaqadaas;
11) **"Liisan ganacsi"** waxa loola jeedaa liisan ama shati loo bixiyay ama loo cusboonaysiiyay si waafaqsan Xeerkan;



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

12) **"Liisan ganacsi dhaqangal ah"** waxa loola jeeda liisan ganacsi loo bixiyay si waafaqsan xeerkan oo aysan ka dhicin mudada dhaqangalnimada liisanka ganacsi ee ku cad Qodobka 11aad ee Xeerkan ama aan lagala noqon si waafaqsan Xeerkan iyo xeerarka kale;

13) "**Soodajiye**" waxa loola jeedaa ganacsade liisan ganacsi u haysta inuu badeecad ama adeeg kasoo dhoofiyo dal dibadeed oo uu keeno Somaliland;

14) **"Dhoofiye"** waxa loola jeedaa ganacsade liisan ganacsi u haysta in uu ka dhoofiyo Somaliland badeecado, xoolo ama adeeg una dhoofiyo dalka dibadiisa;

15) **"Jumladle"** waxa loola jeedaa ganacsade u haysta liisan ganacsi in badeecadaha uu ka soo iibsado soodajiye ama wax-soosaare warshadeed uuna jumlad ahaan kaga sii iibiyo ganacsade tafaariiqle ah, haydaha dawladda, hay'adaha aan dawliga ahayn ama iskaashatooyin;

16) "**Tafaariiqle**" waxa loola jeedaa ganacsadaha haysta liisan tafaariiqayn ee wax ka soo iibsada ganacsadaha jumladlaha ah kuna sii iibiya xaddiga ugu yar ee laga isticmaalo badeecaddaas;

17) **"Kormeere"** waxa loola jeedaa masuulka ay hay'adda liisan bixintu u xilsaartey ama u magacawdey kormeeridda, kor-joogteynta iyo hubinta in hawlaha ganacsigu waafaqsan yihiin Xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka JSL;

18) **"Hay'adda liisan bixinta"** waxa loola jeedaa wasaaradda u xilsaaran ganacsiga iyo dawladaha hoose oo leh awoodda bixinta liisamada ganacsiga sida ku tilmaaman qodobka 5aad ee xeerkan;

19) **"Hay'adda ruqsad bixinta"** waxa loola jeedaa hay'ad dawladeed oo uu sharci gaar ahi awood u siiyay bixinta ruqsad khuseysa nooc ganacsi oo uu sharcigu waajib kaga dhigayo ganacsadeha in uu ruqsad u haysto ka hor inta aanu dalban ama aanu qaadan liisanka ganacsi ee ku waajibay;

20) **"Golayaasha Deegaanka"** waxa loola jeedaa goleyaasha heer degmo ee lagu dhisay si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerka Goboladda iyo Degmooyinka Somaliland, Xeer Lr. 23/2019;

21) **"Wasaaradda"** waxa loola jeedaa wasaaradda u xilsaaran ganacsiga;

22) **"Wasiir"** waxa loola jeedaa wasiirka wasaaradda u xilsaaran ganacsiga;

23) **"Qof ama cid"** waxa loola jeedda qof bani aadam ah ama qof shakhsiyad qaanuuni ah leh;

24) **"Iskaashato"** waxa loola jeedaa iskutag ama isbaahaysi ganacsato wadaagta hawl ganacsi oo isku mid ah ama xidhiidh leh oo ku dhisan xeer loona diiwaangaliyay si waafaqsan Xeerka Shirkadaha Somaliland (Xeer Lr. 80/2018) iyo xeerarka kale ee dalka JSL.

25) **"Waxsoosaare Warshadeed"** waxa loola jeedaa ganacsade kasta oo ka ganacsada:

   a) waxsoosaar ay soo saartay warshad ku shaqaysa mashiino ama gacan; ama
   b) hagaajinta, laxaamadinta, cusboonaysiinta alaabooyinka; ama isugaynta qaybo kala duwan oo waxsoosaar warshadeed ah soona saara wax-soo saar cusub;

26) **"Goobta ganacsi/ga"** waxa loola jeedaa tilmaanta meesha ama goobta ay ku taalo xarunta ama meheradda ganacsi sida tilmaanta xaafadda, waaxda, degmada iyo gobolka;

27) **"Waraaqaha Aqoonsiga"** waxa loola jeedaa kaadhka dhalashada ee ay soo saaraan wasaaradda arrimaha gudaha iyo dawladaha hoose;

28) **"Wakaalad ansax ah"** waxa loola jeedaa wakaalad sharci ah oo ka soo baxday xafiis nootaayo sharci oo ku taal dalka gudihiisa ama dibadiisa lagana soo ansixiyay sharcinimadeeda maxkamada awooda u leh.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 3aad

## Ujeeddada Xeerka

Ujeedooyinka Xeerkan waa: -

1. In la dajiyo nidaam cad oo ku dhisan hufnaan iyo daahfurnaan oo loo raaco bixinta liisamada ganacsiga isla markaana ah nidaam si fudud u gaadha ama ay u heli karto cid kasta oo ganacsato ahi ama danaynaysa in ay ka qayb qaadato ganacsiga Somaliland.
2. In la xoojiyo korna loo qaado kalsoonida ay ganacsatada iyo maalgashadeyaashu ku qabaan hay'adaha dawliga ah iyo nidaamyada sharci ee khuseeya ganaciga Somaliland;
3. In la qeexo waajibaadyada iyo masuuliyadaha hay'adaha dawladeed ee u xilsaaran bixinta liisamadaga ganacsiga.

## Qodobka 4aad

## Xadka Dabaqidda Xeerkan

1) Xeerkan waxa lagu dabaqayaa dhammaan liisamada ganacsiga ee kala ah:

   a) Liisamada ganacsiga baayacmushtarka (merchandising business licensing) ee dhoofinta, soodejinta ama dhoofinta iyo soodejinta, ganacsiga jumladlaha ah iyo ganacsiga tafaariiiqlaha ah;

   b) Liisamada ganacsiga waxsoosaarka warshadaha (manufacturing business licensing); iyo

   c) Liisamada ganacsiga adeegyada (service business licensing).

   d) Nidaamka Bixinta Liisamada Ganacsiga casriga ah oo ay wasaaradu ka hirgalin doonto Gobolada Dalka oo dhan (Electronic Business Licensing and Registration System" OSS").

2) Liisamada ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan laguma dabaqayo ka ganacsiga:

   A) Beerafalashada, dhaqidda xoolaha ama dhir beeridda aan ujeedo ganacsi laga lahayn ee loo sameeyo si loogu noolaado.

## QAYBTA 2AAD:

## LIISAMADA GANACSIGA

## Qodobka 5aad

## Awooda Bixinta Liisamada Ganacsiga

1) Liisamada ganacsiga baayacmushtarka **(merchandising business license)** ee soodejinta ama dhoofinta ama labadaba, iyo liisanka ganacsiga jumladlaha ah (wholesaler) waxa bixinaysa Wasaaradda.

2) Liisamada ganacsiga wax-soosaarka warshadaha **(manufacturing business license)** iyo liisamada ganacsiga adeegyada **(service business license)** ee shirkadaha ganacsiga (companies), kuwa shuraakada ah (partnerships) iyo iskaashatooyinka ganacsiga (cooperatives) kuwaasi oo leh jiritaan qaanuuni ah (body corporate), isla markaana loo aasasay loona diiwaangaliyay si waafaqsan Xeerka Shirkadaha



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Somaliland Xeer Lr. 80/2018, waxa bixinaysa Wasaarada iyadoo loo raacayo Foomka Codsiga Liisanka sida ku cad Lifaaqa 1aad ee Xeerkan.

3) Liisamada ganacsiga ee ku xusan Faqradda 2aad ee Qodobkan, ee la xidhiidha wax-soosaarka warshadaha iyo adeegyada shirkadaha ganacsiga waxay Wasaaraddu bixinaysaa kadib marka ay shirkadahaasi ka helaan ama ka soo qaataan ruqsaddii ogolaanshaha hawlqabad ee wasaaradaha ama hay'adaha ay khusayso si waafaqsan xeerarka khuseeya ee la xidhiidha ogolaanshaha ruqsadahaas.

4) Liisamada ganacsiga baayacmushtarka **(merchandising business license)** ee ganacsatada Tafariiqlaha ah **(Retail Trader)** ee aan ahayn kuwa ku xusan faqradaa 1aad ee qodobkan waxa bixinaya Dawladaha Hoose.

5) Liisamada ganacsiga hal-mulkiilaha ah (sole propriatership) ee aan ahayn kuwa ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan, ee ay leeyihiin ganacsatada muwaadiniinta ama ajaanibka ah ee ganacsigoodu la xidhiidho xirfadaha iyo adeegyada ku taxan Lifaaqa 2aad (B) waxa bixinaya Dawladaha Hoose.

**Qodobka 6aad**

**Ogolaanshaha iyo ku Shaqaysiga Liisamada Ganacsiga**

1) Ganacsadena dalka Jamhuuriyadda Somaliland kama qaban karo hawlo ganacsi haddii aanu u haysan liisan ganacsi dhaqangal ah oo loo siiyay si waafaqsan Qodobka 5aad ee xeerkan.
2) Ganacsadena laba ganacsi ama in ka badan oo kala duwan kuma wada yeelan karo isla hal goob ganacsi, hadii uuna ganacsi kasta gaarkii ugu haysan liisanka ganacsi ee khuseeya.
3) Ganacsadaha haysta liisan ganacsi oo dhaqangal ah, ee soo dejinta ama/iyo dhoofinta ama liisanka ganacsiga wax-soosaarka warshadaha ama liisamada ganacsiga adeegyada ee ay bixiso wasaaraddu, waxa uu laamo ganacsi oo kale dalka gudihiisa ku furan karaa liisankaasi uu haysto.
4) Ganacsadaha liisan ganacsi u haysta soo-dajiye waxa loo ogol yahay in uu goobta ama xarunta ganacsigiisa uu badeecadda uu soo dajiyay **jumlad** ahaan ugaga sii iibiyo ganacsadeyaasha haysta liisan jumladle isagoon laga dooneynin in uu qaato ama haysto liisan **jumladle** ah.
5) Ganacsadaha liisan ganacsi u haysta soo-dajiye waxa loo ogol yahay in uu goobta ama xarunta ganacsigiisa uu badeecadda uu soo dajiyay jumlad ahaan ugaga sii iibiyo ganacsadeyaasha haysta liisan jumladle ama tafaariiqle ah isagoon laga dooneynin in uu qaato ama haysto liisan jumladle ah.
6) Ganacsatada ku xusan Faqradaha 4aad iyo 5aad ee Qodobkan, hadii ay tafaariiq ku iibiyaan waxsoosaarkooda ama badeecadaha ay soo dejiyaan, waxa ku waajiba inay qaataan liisanka tafaariiqda ee ay dawladaha hoose bixiyaaan.

**QAYBTA 3AAD**

**HAB-RAACA BIXINTA LIISAMADA GANACSIGA**

**Qodobka 7aad:**

**Codsiyada Liisamada Ganacsiga**

1) Ganacsade kasta oo doonaya in uu qaato liisamada ganacsiga baayacmushtarka ee soo dajinta ama/iyo dhooofinta ama liisanka ganacsiga jumladlaha ama liisanka shirkadaha ganacsiga wax-soosaarka



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

warshadaha **(manufacturing business license)** ama liisamada shirkadaha ganacsiga adeegyada **(service business license)** ee ay Wasaaraddu bixiso waxa uu codisigiisa u soo gudbinayaaa Wasaaradda isagoo ku soo **muujinaya foomka** Codsiga Liisanka ganacsi ee uu dalbanayo.

2) Haddii codsadaha liisamada ganacsiga ee ku xusan Faqradda 1aad ee Qodobkani uu yahay ganacsade soodajiye ama/iyo dhooofiye, ama jumladle, ama warshadle, ama adeeg bixiye ah shirkad ganacsi, ama shuraako ama iskaashato, waxa uu foomka codsiga liisanka ganacsi ku soo lifaaqayaa faah-faahintan:

   a) Magaca iyo ciwaanka codsadaha.

   b) Magacyada iyo aqoonsiga saamilayaasha iyo maamulayaasha shirkadda oo ay la socdaan laba sawir oo kur ah oo uu leeyahay saamiile kasta ama maamule kasta.

   c) Nuqul shahaadada diiwaangalinta shirkadda ah.

   d) Nuqul ka mid ah xeer-hoosaadka iyo qoraalka aasaaska shirkadda oo ka soo baxday xafiis nootaayo sharci

   e) Hadii codsiga uu soo gudbiyay wakiil, wakaalad ay soo ansixiyeen mulkiileyaasha shirkadda ama Guddoomiyaha shirkaddu ugu wakiishay iyo waraaqaha aqoonsiga wakiilka oo ay la socdaan labo sawir oo kur ah.

   f) Faah-faahinta nooca ganacsi ee liisanka ay u codsanayaan.

3. Hadii codsadahu yahay shirkad (company) ama shuraako (partnership), ajaanib ah:

   a) Magaca ciwaanka iyo dalka uu codsadaha ka soo jeedo oo dhamaystiran

   b) Faah-faahinta nooca ganacsi ee liisanka ay shirkadu ama shuraakadu codsanayso

   c) Nuqulka rasmiga ah ee Shahaadada caddeynaysa jiritaankooda shirkad ahaaneed oo ka soo baxdey xafiiska u qaabilsan wadanka ay sharicigiisa haysato

   d) Nuqulo ansax ah oo khuseeya xeer-hoosaadka shirkada ee loo yaqaan [Memorundum iyo Article of Association] oo uu ku saxeexan yahay garyaqaan, xafiis nootaayo sharci ah.

   e) Magacyada iyo faahfaahinta xubnaha hoggaanka shirkadda ama shuraakada iyo cida uga wakiilka ah codsadaha Somaliland, iyo laba sawir oo kur ah oo xubnahaasi leeyihiin;

   f) Qoraal cadaynaya Qorshaha Ganacsi ee uu u dejiyay maalgalinta ganacsiga iyo maaliyada uu ugu talo galay

   g) Cadayn inuu u hayo fulinayana maalgalinta ganacsi oo ka soo baxday bangi calami ah ama mid maxali ah ama waa in uu haysto qoraal cadayn ah cida ku maalgalinaysa fulinta hawshan ganacsi

   h) Warqad cadanaysa in aanay shirkada iyo shaqsiyaadka ka masuulka ahiba wax dambiya ka soo galin dalkii ama dalalkii ay ka hawlgalaysay ugu yaraan 6dii bilood ee ugu dambaysay.

   i) Warqad caddeynaysa ogalaanshaha xafiis wakaaladeed Shirkadda ah in laga furo Somaliland.

   j) Warqad cadaynaysa in qofka ajnabiga ah ogolaaansho dal ku gal ama degenaansho loo siiyay si waafaqsan Xeerka Socdaalka ee Jamhuuriyadda Somaliland.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

k) Go'aan saamiilayda shirkaddu ama mulkiileyaasha shuraakadu ku ogolaanayaan codsashada liisanka ganacsi;

l) Shahaadada diiwaangalinta ganacsi, si waafaqsan Xeerka Shikadaha Somaliland Xeer Lr. 80-2018 oo caddeyneysa in shirkadu/codsaduhu ka diiwaan gashan yahay Somaliland;

4. Ka sokow shuruudaha ku xusan faqradaha kore, codsadahu waxa uu soo raacinayaa foomka codsiga ganacsi dhokumentiyadan hoos ku xusan, hadba inta ka khuseysa:
   a) Shahaado maalgashi ansax ah oo waafaqsan Xeerka Maalgashiga Somaliland hadii codsaduha yahay Maalgashade;
   b) Ruqsadda ogolaanshaha hawlqabadka oo ansax ah, hadii ganacsiga liisanka ganacsi loo codsanayaa yahay ganacsi sharciyan u baahan in loo haysto ruqsad;

## Qodobka 8aad

## Bixinta Liisanka Ganacsiga

1. Wasaaraddu marka ay hesho codsiga liisanka ee loo soo gudbiyo, hubisana in codsigaasi waafaqsan yahay shuruudaha ku xusan Qodobka 7aad iyo Qodobka 10aad ee Xeerkan, waxa ay codsadaha siinaysaa liisanka ganacsi ee uu soo codsadey;
2. Liisan kasta oo loo bixiyo si waafaqsan Qodobkan waa in uu si cad u qeexayaa nooca ganacsi ee baayacmushtarka ama nooca ganacsi ee waxsoosaarka warshada ama nooca ganacsiga adeegyada ee liisanka loo bixiyay.
3. Haddii Wasaaraddu **u cadaato in aanu codsigu** buuxin shuruudihii looga baahnaa, waxay codsadaha ku wargalinaysaa in loo diidey liisanka uu soo codsadey iyadoo siinaysa codsadaha qoraal qeexaya sababta loogu diidey.
4. Codsadaha loo diiday liisanka si waafaqsan Faqrada 3aad ee Qodobkan waxa uu xaq u leeyahay inuu cabasho ka gudbiyo sida uu dhigayo qodobka 20aad ee Xeerkani.

## Qodobka 9aad

## Cidda aan Xaqa u Lahayn Qaadashada Liisan Ganacsi

1) Wasaaraddu waa in ayna siin liisan ganacsi:
   a) Hadii codsadaha da'diisu ka yartahay shan iyo toban (15) jir ama aanu ahayn dhaxlaha hantida ganacsi haba ahaado mid ka yar da'daase.
   b) Hadii codsaduhu aanu haysan ruqsadda ogolaanshaha ganacsiga uu liisanka u dalbanayo marka liisanka la codsanayaa khuseeyo nooc ganacsi ay waajib sharciya tahay in loo haysto ruqsad.
   c) Haddii codsadaha si waafaqsan xeerkan ama xeerarka dalka ay maxkamad ama hay'ad dawladeed oo cuskanaysa xeer dhaqangal ah uga mamnuucdo ganacsiga nooc ama dhammaan baayacmushtarka, waxsoosaar warshadeed ama bixinta adeega ganacsi, inta ay ka dhammaanayso muddada laga mamnuucay.
   d) Haddii liisan ganacsi oo uu hore u haysatay lala noqday ama dambi lagu helay sida xeerkan ama xeerar kale oo dhaqan gal ihi tilmaameen.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

e) Haddii codsaduhu yahay shirkad kacday (musalaftay) ayna amartay maxkamadda awoodda u leh in shirkadaas albaabada loo xidhay oo ay laalaabatay;
f) Marka codsaduhu yahay ajaanib, hadii uuna buuxin shuruudaha ku xusan Qodobka 7aad Faqradiisa 3aad ee xeerkan.

## Qodobka 10aad

## Ujuurooyinka Liisamada Ganacsiga

1) Wasiirku isagoo la tashanaysa Wasiirka Wasaaradda u qaabilsan arrimaha maaliyadda ee JSL waxa uu soo saarayaa takaaliifta ujuurooyinka kala ah:

    a) Ujuurada codsiyada liisamada ganacsiga.
    b) Ujuurada sanadlaha ah ee cusboonaysiinta liisamada ganacsiga
    c) Ujuurada wareejinta liisanka
    d) Ujuurada bedelaada liisamada lumay.

2) Takaaliifta ujuurada ganacsi ee ku xusan Faqradda 1aad ee Qodobkan waa in lagu saleeyo darajooyinka kala duwan ee liisamada ganacsiga.
3) Takaaliifta ujuurada ganacsi ee loo soosaaro si waafaqsan Faqradda 1aad ee Qodobkan waxa la raacin karaa qorshaha miisaaniyada sannadlaha ah ee Golaha Xukuumadu u soo gudbiso Golaha Wakiilada si loo ansixiyo.
4) Takaaliifta ujuurooyinka liisamada ganacsi ee ay bixiyaan degmooyinku waxa awood u leh gudida fulinta ee degmada, waxase shardi ah in laga ansixiyo Golayaasha Degaanka si waafaqsan Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka iyo xeerarka kale ee khuseeya.

## Qodobka 11aad

## Mudadda Dhaqan-Galnimada Liisanka Ganacsi

1. Liisan kasta oo ganacsi oo ay u bixisay Wasaaraddu si waafaqsan qodobada xeerkan waxa uu dhaqangal ahaanayaa mudo hal sano ah oo ka bilaabmaysa taariikhda la bixiyey liisanka
2. Faqradda 1aad ee Qodobkan la dabaqi maayo hadii Wasaaradda ay u caddaato in ganacsdaha liisanka ganacsi loo siiyay si waafaqsan xeerkani uu ku xadgudbay waajibaadyada ay dhigayaan Qodobada 6aad iyo 21aad ee Xeerkan.
3. Noocyada liisamada ganacsi ee ku kala jira Lifaaqa 2aad (A) iyo (B), wasiirku waxa uu wareegto ku soo saari karaa noocyada ganacsi ee aan ku jirin liiska hadii loo arko lagama maarmaan

## Qodobka 12aad

## Cusboonaysiinta Liisanka

1. Liisamada ganacsiga ee ay bixiso Wasaaradu waa in la cusboonaysiiyo sida ku cad Qodobka 11aad Faqradiisa 1aad ee Xeerkan.
2. Codsadaha cusboonaysiinta liisanka ganacsigu waxa uu Wasaaradda u soo gudbinayaa codsiga cusboonaysiinta liisanka ganacsi iyo nuqul ka mid ah liisankii ganacsi ee uu hore u haystay si loogu cusboonaysiiyo



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. Ganacsadaha aan ku cusboonaysiisan liisankiisa ganacsi mudadda ku xusan Qodobka 11aad ee xeerkan, waxaa laga qaadayaa tallaabooyinkan hoos ku xusan:
   a. Ujuuradda cusboonaysiinta liisanka ganacsi iyo ganaax lacageed oo u **dhigma boqolkiiba toban (10%)** qadarka ujuurada cusboonaysiinta liisanka hadii uu soo codsado **hal bil** ka dib taariikhda uu ka dhacay; ama
   b. Ujuuradda cusboonaysiinta liisanka ganacsi iyo ganaax lacageed oo u dhigma **boqolkiiba shan iyo labaatan (25%)** qadarka ujuurada cusboonaysiinta liisanka hadii uu soo codsado **laba** bilood kadib taariikhda dhaqangalnimada liisankaasi.
4. Haddii ganacsaduhu ku cusboonaysiisan waayo liisankiisa mudada ku xusan Faqradda 3aad ee Qodobkan, Wasaaradu waxay **hakinaysaa mudo sadex bilood ah, ka dibna hadii uu ku cusboonaysiisan waayo waa la** laalayaa liisankaasi ganacsi iyadoo meheradaas ganacsi laga xidhayo;
5. Haddii uu ganacsadahaasi doono in uu helo liisanka looga laalay si waafaqsan Faqradda 4aad ee Qodokan, waxa uu karaa in **Lix bilood** kadib dhammaadka muddada ku xusan Faqradda 3aad ee Qodobkan uu u dalbado liisankaasi si cusub isaga oo bixinaya ajuurada liisanka cusub iyo ganaax lacageed oo u dhigma kala badh ajuurada codsiga liisanka cusub.

## Qodobka 13aad

## Xaqa uu yeelanayo Cidda Liisan Ganacsi la Siiyo

1. Qofka la siiyo liisan ganacsi loo bixiyay si waafqsan Xeerkan waxa uu xaq u leeyahay: -
   a) In uu ku ganacsado meheradda ama hawsha ganacsi ee loo siiyay kuna cad liisanka, uguna shaqaysto si waafaqsan Xeerkan;
   b) In uu laamo kale oo ganacsi uu isla liisankaas uu haysto ugu furto goobo kale isagoon lagu qasbin ama laga dooneynin in uu u qaato liisamo ganacsi oo dheeri ah;
   c) In xogta uu u baahdo uu ka helo Diiwaanka Ganacsiga, iyo hawl-wadeenada Wasaaradda; iyo
   d) In uu wax ka bedalo liisankiisa si waafaqsan Xeerkan.

2. Liisan kasta oo loo bixiyo si waafaqsan xeerkani uma xaqsiin doono qofna in uu ka ganacsado meherad ama hawl ganacsi uu xeer kale mamnuucay in laga ganacsado; kamana reebi doonto ama kama dhaafi doonto qofka la siiyay fulinta shuruud ama dhawrista xaddidaad ama waajibaad kale oo uu saarayo ama uu ku waajibinayo xeer kale oo khuseeya ganacsiga uu liisanka u haysto.

## Qodobka 14aad

## Waajibaadyada Cidda Liisan Ganacsi la Siiyo

1. Ganacsadeha liisan ganacsi la siiyo waxa ku waajib ah in:
   a) Aanu hawlaha meheradaha ganacsi ee uu liisamo kala gaar ah u haysto isugu keenin hal goob ganacsi, marka meel isugu keenidda ganacsiyadaasi khatar galin karayaan caafimaadka ama/iyo amniga dadweynaha, ama dhalin karto lunsi ama waxyeelo hantiyeed;
   b) Uu liisanka sudho ama ku dhajiyo meel goobta gancsigiisa ah oo uu si fiican uga muuqan karo loogana arki karo;



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

c) Uu tuso ama uu soo celiyo liisanka ganacsi marka ay sidaasi ka dalbadaan koormeereyaasha ama saraakiisha wasaaradu;
d) Uusan liisanka u dhiibin ama ka kireyn cid kale oo ku faa'iideysata ama ku ganacsata;
e) Uusan isticmaalin liisanka ganacsi hadii uu jiro amar maxkamdeed oo saaran ganacsigiisa; iyo
f) Uu ilaaliyo dhammaan waajibaadyada ka saaran ilaalinta tayada iyo minqiyaasyada kale ee khuseeya ganacsiga uu liisanka u haysto;

## Qodobka 15aad

## Wareejinta Liisanka Ganacsi

1. Qof kasta oo la siiyo liisan ganacsi wuxuu xaq u leeyahay inuu liisankiisa cid kale ugu wareejiyo qaab iib ah ama siin ah ama dhaxaltooyo ah ama qaab kale oo lamida;
2. Wareejinta liisanka ganacsi ee ku xusan Faqraddda 1aad ee Qodobkani, waxay suurto galaysaa:
   a) Marka uu ganacsaduhu ku baahiyo muddo hal bil ah faahfaahinta wareejintaasi warbaahinta dalka, la waayo cid ka hortimaad wareejintaas ama aysan jirin amar hakin (suspension order) ah oo ay Wasaaraddu saartey;
   b) Marka ganacsadaha wareejinaya liisanku ka keeno Xafiiska Cashuuraha Beriga caddeyn muujinaysa in aan wax cashuur ah liisankaasi lagu lahayn;
   c) Marka uu caddayn qoraal ah oo ka soo baxday xafiis Nootaayo oo **sharciya ah** oo uu ganacsaduhu ku cadaynayo wareejinta ganacsiga.
   d) Marka uu caddayn qoraal ah oo ka soobaxday xafiis Nootaayo oo uu ganacsaduhu ku cadaynayo wareejinta ganacsiga;

3. Wasaaraddu kadib markay hesho codsiga wareejinta liisanka ee ay ku qanacdo in la buuxiyay shuruudaha ku xusan Faqradda 2aad e Qodobkan, waxay amreysaa in ganacsadaha wareejinaya liisanku soo celiyo liisankii hore, kadib soo celinta liisankaas waxay liisan ganacsi cusub siineysaa cidda liisanka lagu wareejiyey.

## Qodobka 16aad

## Codsiga Liisan Ganacsi Lumay ama Waxyeeloobey

1. Ganacsadaha uu ka lumo ama waxyeelo ka soo gaadho liisan ganacsi ay Wasaaraddu u siiyay si waafaqsan Xeerkani, waxa uu karaa inuu Wasaaradda u soo gudbisto codsi qoraal ah oo ay ku lifaaqan yihiin waxyaabahan hoos ku xusan:
   a) Liisanka ganacsi ee waxyeeladu gaadhay;
   b) Hadii liisanka ganacsi lumay, qoraal caddeyn ah oo ka soo baxay saldhigga boolis ee ugu dhaw caddeynaya lumitaanka liisankaasi;
   c) Laba sawir oo kur ah oo **mulkiiladaha ama** maamulaha **soo** codsaday
   d) Caddeyn cashuur la'aan oo ka soo baxdey xafiiska cashuuraha bariga; iyo
   e) Hadii codsiga uu soo gudbiyey wakiil, qoraal wakaaladeed ansaxsan oo mulkiilaha/yaasha ganacsigaasi ku wakiisheen wakiilka, iyo waraaqaha aqoonsiga muwaadinka ama baasaboorka wakiilka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Wasaaaradu kadib marka ay hubiso in codsigu waafaqsan yahay shuruudaha ku xusan Faqradda 1aad ee Qodobkan, waxay siinaysaa codsadaha liisan ganacsi oo badalaya liisanka ka waxyeeloobey ama ka lumey.
3. Codsaduhu waxa uu bixinayaa **5%** ujuurada liisanka ganacsi ee laga qaado nooca ganacsiga liisanka ka lumey ama ka waxyeeloobey.

## QAYBTA 4AAD:

## KORMEERKA, XAYIRISTA IYO KALA-NOQOSHADA LIISANKA GANACSI

### Qodobka 17aad

### Kormeerka

1. Wasiirku waxa uu magacaabayaa hawlwadeeno **wasaaradda ka tirsan** kormeer hawshoodu tahay kormeeridda hawlaha ganacsiga iyo hubinta in liisamada ganacsi loo **fuliyey si** waafaqsan xeerkan, iyo xeer hoosaadyada iyo awaamiirta ka farcama xeerkan.
2. Saraakiisha Koormeerka ee **kuxusan farqada 1aad** waxay awood u leeyihiin in ay galaan goobaha ganacsiga, sameeyaanan baadhitaan si ay u hubiyaan in ganacsaduhu liisan ganacsi haysto iyo in hawsha ganacsigu waafaqsan tahay liisanka loo haysto.
